

Wada Hadal



helps children
communicate

REGISTERED CHARITY 210031

Supported by
openreach
BT Group business 

**Ka caawinta carruurta barashada
xirfadaha hadalka**



Barashada hadalka

Hadlidda, fahmidda dadka kale iyo garashada waxa la odhanayaa intuba runtii waa xirfado muhiim ah. Waxayna ka caawiyaan carruurta inay saxiibbo yeeshaan, si buuxdana u bartaan uguna raaxaystaan nolosha.

Geeddiga u dhaxeeya ilmo hadal barad ah ilaa ilme hadal badan waxay u muuqataa mucjiso, laakiin ilmahaagu wuxuu kaaga baahan yahay ADIGA inaad ka caawiso in sidani dhacdo. Macluumaadka iyo qodobadda buuggan yar way caawin doonaan. Ku hadlidda luuqadda hooyo waa muhiim si aad u siiso ilmahaaga bilaw fiican.

Caruurta Yaryar

Carruurta way inala hadlaan ilaa dhalashadooda. Oohintoodu waxay inoo muujisaa inay gacjoonayaan ama ay dhibban yihiin. Way ilka caddeeyaan oo inna soo eegaan marka aynu hadlayno. Marka aynu la hadalno, waxay bilaabaan inay fahmaan erayada fudud ee aynu leenahay.

Carruurta waxay jecel yihiin inay ku ciyaaraan jabaqaha iyagoo “hadaaqaya”. Erayadooda u horreeyaa waxay muuqdaan 12 – 18 bilood. Waxa dhici karta inayna u muuqan erayo qof wayn, laakiin markaad dhagaysato ayaad bilaabi inaad garato waxa ay u jeedaan.

Socod-baradyada

Inta socod-baradyadu ay korayaan, sidoo kalena waxa kordhaya tirada erayada ay fahmaan iyo inta ay isticmaalaan. Fahmidda ereyada ayaa horraysa, isticmaalka ereyadnina way ku xigtaa.

Kadib ereygooga u horreeya, socod-baradyadu waxay dhisaan ilaa 100 eray kuwaasoo ay isticmaalaan hal wakhtigiiba. Marka xigta, way ku dhagaystaan waxayna bartaan sida erayada la isugu xidho. Waxay bilaabaan inay laba erey isku xidhaan weedh yar. Kadib waxay isticmaali doonaan weedho dhaadheer.

Saddex jirkoodana, carruurta waxay fahmi karaan ereyada meelaynta sida **kahooseeya** iyo **u dhaw** iyo su’aalaha sida **mee?** ama **maxay?**

Carruurta da'da yar

Afar jirku wuxuu bilaabaa isticmaalka weedho dhaadheer. Waxay bartaan oo ay isticmaali ereyo badan oo cusub waxayna ka hadli wixii ay sameeyeen. Waxay bilaabi inay waydiiyaan su'aalo badan kuna raaxaystaan dhagaysiga waxa dadka kale dhahayaan.

Waxay kala kulmaan dhawaaqyada qaarkood dhib, laakiin dadka waawayn badankoodu way fahmaan. Xirfadahan oo dhama waxay ka caawiyaan carruurta inay u diyaargarobaan dugsiga.

Ka raadi wax badan
www.talkingpoint.org.uk



Tibaaxo wax ku oola

La hadalka iyo la ciyaaridda ilmahaagu isagay u fiican tahay waxay ka dhigaysaa nolosha mid kuu fudud. Tibaaxahan fudfududi waxay kaa caawin doonaan.

Helista niyadda ilmaha


U jeedso ilmahaaga ama la fadhiiso. Ugu yeedh magaciisa kahor intaanad bilaabin hadalka. Kahadal wax labadiinuba hortiina ku aragtaan. Tani waxay ka caawisaa ilmaha waxa ereyga looga jeedo.

Wada maadaysta

Isticmaal ficilo, hees, same codad iyo dhaqdhaqaaqo qosol leh. Ha khajilin, is yara xumayntu waxay kaa caawinaysaa inaad soojeediso ood ka qosliso.

Faallooyin maya su'aalo

Waydiinta su'aalo badan waxay dareensiin kartaa imtixaan oo kale. Ka dhig wada sheekaysi. Ka faallood waxa uu qabanayo iyo waxa dhacaya.



Wakhti sii ay fakaraan

Carruurta waxay u baahan yihiin wakhti ka badan ka dadka waawayn si ay uga fakaraan wixii ay maqleen, iyo inay go'aansadaan waxa lagu jawaabayo. Sii wakhti ay ku jawaabaan, oo fiiri iyaga inta aad sugayso.

Isticmaal luuqad fudud

Ka dhig weedhahaaga kuwo koobkooban. Tusaale, "Xilligi cuntada waa hadda" ama "Cajjib, waxaad dhisaysaa fooq".

Ku celi wixii aad tidhi

Way fiican tahay inaad tidhaa wax isku mida mar labaad. Carruurta yaryar iyo socod-baradku waxay u baahan yihiin inay maqlaan ereyo iyo weedho wakhti badan si ay u fahmaan una bartaan ereyo cusub.

U fududee si ay u dhagaystaan

Ka daminta miisiga, raadiyooga ama TV-gu waxay ka caawisaa carruurta inay u soo jeestaan ereyadaada.

Ku dul dhis waxay dhahayaan

Ugu kordhi hal ama laba erey waxa uu dhahayo, taasina waxay ka caawin doontaa ilmahaaga inuu u gudbo marxaladda labaad ee hadalka. Sidaa darteed, haddii ilmahaagu dhaho "bas" dheh "Haa, bas wayn".

Ku hadlidda luuqaddaada hooyo

Waa u muhiim carruurta inay ku bartaan luuqaddooda hooyo ereyadooda iyo weedhahooda hore. Ilmahaagu wuxuu baran doonaa Ingiriisiga mar dambe, barbaarinta iyo dugsiga.

U fududee inay hadlaan

Walxaha weheshiga ee amuumuha ah wuxuu kaa hor istaagi karaa jidka hadalka. Isku day in loo adeegsado keliya wakhtiga hurdada. Debadda u kaxayso si aad ula hadasho.

Tus jidka hagaagsan ah

Carruurta yaryari badanka waxay galaan khaladaad. U muuji inaad fahamtay, intaad waydiin lahayd inay ugu celiyaan ereyada si sax ah. Ugu laqin ilmahaaga ereyga ama weedha si sax ah mar kale. Hadday dhahan "Fiiri eyga", waxaad dhihi kartaa "Haa, waa ey".

Naqil waxa ay dhahayaan

Dib ugu celi codadka, ereyada iyo weedhaha. Ha noqoto "la la" ama "Alla, maad jeceshahay muuska?", waxay muujinaysaa inaad xiisaynayso iyo in codadka iyo ereyaduba ay muhiim yihiin.

Barashada hadalku wuu adkaan karaa

Carruurta qaar waxay kala kulmaan hadalka iyo dhagaysiga dhib.

Waxay kala kulmi karaan dhib fahamka macnaha ereyada iyo weedhaha. Qaar waxay la raftaan helista ereyga dhawaqa saxda ah si ay u isticmaalaan uguna dhigaan nidaamka saxda ah. Carruurtani waxay u baahan karaan caawimo dheeri ah.

Haddaad ka walaacsan tahay ilmahaaga, la hadal dadka aad taqaan iyo kuwa yaqaan ilmahaaga. Marxadaha buugan yar ayaa ku hagi doona maadaama ay ku habboon yihiin carruurta badankooda. Xasuusnow, carruurta way kala duwan yihiin.

Haddaad wali walaacsan tahay, raac dareenkaaga. La hadal qof ku caawin kara, tusaale dhakhtar hadalka iyo luuqadda ah ama booqdahaaga caafimaadka ama GP.

Xilligaas, si aad u caawiso bilaabid, raac qodobada buuga yar. Booqo www.talkingpoint.org.uk si aad u hesho macluumaad badan.

Waxaad tahay macalinka ugu horreeyo ee ugu muhiimsan ilmahaaga. Waxaad wada qabataan dhab ahaantii wuu caawin karaa ilmahaaga!


Booqo www.talkingpoint.org.uk/talkinglinks si aad u hesho dhakhtarka hadalka iyo luuqadda ee kuugu dhaw, ama waydii xarunta carruurta deegaankaaga.

Khayraadka faa'idada leh ee I CAN

Adeegga I CAN wuxuu ka shaqeeyaa ka caawinta carruurta oo dhama inay kobciyaan xirfadaha hadal iyo dhagaysi. Waxaanu haynaa DVDs iyo buugaag waxqabad kuwaasoo runtii aad faa'ido kala kulmi doonto.

Carruurta Yaryar ee Hadaaqaysa

Koox 30 hawlqabad madadaalo ah, oo si qurux badan loogu xardhay kaadhahd si loola ciyaaro carruurta laga bilaabo 18 bilood jir, si aad u taageerto koboca hadalkooda, luuqaddooda iyo la xidhiidhka.



Hadalka Soco-baradka

Koox kabadan 30 hawlqabad madadaalo ah oo si qurux leh loogu xardhay kaadhahd adag si loola ciyaaro socod-baradka laga bilaabo 18 bilood ilaa 3 jir, si aad u taageerto koboca hadalkooda, luuqaddooda iyo la xidhiidhkooda.



Buugaa Ku-xisaabtan leh

DVD dhiirgalin leh oo ay la socdaan afkaar ka caawinaya ilmahaaga koboca xirfadaha hadalka iyo dhagaysiga, iyo kalfadhi heeso la-qaadid ee carruurta si ay ula qaadaan heesaha.




U diyaar ah Hadal Joogto ah

Buug hawlqabad dhinacyo badan oo ciyaaro fiican si ay uga caawiyaan ilmaha inuu u diyaargaroobo dugsi-horaadka iyo kadiba.



La xidhiidhka Buugga Wax Karinta

Buug hawlqabad oo ay kabuuxaan afkaar iyo kujirayaal lama huraaan u ah carruurta hadda dugsiga bilaabay.



Ka dalbo khayraadkan
www.ican.org.uk/resources

**I CAN waa hay'adda samofalka
xidhiidhidda carruurta. Waxaan
ka shaqaynaa si aanu u caawino
carruurta oo dhan si ay u kobciyaan
xirfadahaoga hadalka iyo dhagaysiga.**

Si aad u hesho wax badan oo
kusaabsan I CAN waxay ku taageerto
waalidka, booqo
www.ican.org.uk/parents

Si aad u dalabto buugaagta yaryar ee
Wada Hadal oo badan booqo
www.ican.org.uk/resources

Si aad uga hesho macluumaad dheeraad
ah I CAN adoo sii maraya warsidahayaga,
ka samayso akoon
www.ican.org.uk/register

haddaad rabto inaad caawiso I CAN
inay caawiso carruurta, booqo
www.ican.org.uk/supportus

I CAN
8 Wakley Street
London
EC1V 7QE
info@ican.org.uk

macluumaad dheeraad ah wac
0845 225 4073 / 020 7843 2552